



## Tegista Dacwada Dhageysiga (Guri Ka Saarida) Sida Sharciyaysan Xukun Maxkamadeed Loo Marayo

- 
- ❖ Akhri tan haddii aad ku nooshahay Gobolka Washington oo keliya.
  - ❖ Waxaad ka heli kartaa dhammaan xaashiyaha warka xaqiiqda ah ku yaalaan halkan [WashingtonLawHelp.org](http://WashingtonLawHelp.org).
  - ❖ Wargalinta xaaladaha Coronavirus / COVID-19: ilaa Agoosto 1deeda, mulkiilahu guriga wuxuu kaaga saari karaa oo keliya dhowr sababood oo yar awgood. Akhri [Coronavirus \(COVID-19\): Lagaama saari karo guriga inta lagu jiro dhibatadaan haddii aadan sameyn wax qatar ah, ama mulkiilahaagu doonayo inuu iibiyo ama uu guriga u soo guuro mooyaane.](#)
- 

### Miyaan isticmaalaa midaan?

Haa, haddii labaduba ay run yihiin:

1. Milkiilahaagu wuxuu ku siiyay Xukun Maxkamadeed oo Kugu Qasbaya inaad Maxkamada Tagto si uu si Sharciyaysan Guriga Lagaaga Saaro (Summons and Complaint for Unlawful Detainer).
2. Waxaad uga jawaabtay adigoo gudbinaya Ogaysiiska Imaanshaha. Qorshahaaguna yahay inaad ka dagaalanto guri ka saarista.

### Waa maxay dacwada dhageysiga ee loo yaqaan Cadeyn Tusida (Show Cause)?

Haddii aad maxkamada ka hesho Amar aad ku Tusayso Cadayn oo uu la socdo Xukun Maxkamadeed oo Kugu Qasbaya inaad Maxkamada Tagto, taasi waxay kuu sheegaysaa in uu mulkiilahu dacwo dhageysi ah uu maxkamada ka qabtay. Dacwadaasna waxaynu ugu yeedhaynaa Dacwadii Cadyenta Lagu Tusayay (Show Cause Hearing).

Haddii aad hesho Amarka aad ku Tusayso Cadeyn oo aad rabto in aad ka dagaallanto guri ka saarista, **waa in aad tagtaa dacwada dhegeysiga**. Kuma filna oo keliya in aad

- Geeyso Ogeysiiska Imaashahaaga ama Jawaab
- Aad u geeyso kiradaada Xoghayaha Maxkamadda Sare ama aad xareeyso Qoraal Dhaar ah

### **Goorma iyo halkee dacwada dhageysigu ka dhici doonaa?**

Taariikhda iyo saacadduba waxay ku qoran yahiin warqada Amar aad ku Tusayso Cadaynta **Waa in aad waqtiga lagaa rabo aad ku timaaddaa!**

### **Sidee howshu u socotaa marka la tago Dacwada Dhageysiga ee Cadeyn Tusida?**

Garsoore ama Gudoomiye ayaa go'aamin doona hadii is difaacaaga guri ka saaridu yahay mid wanaagsan. Waxaa dhici karta inaad isla markaaba kayska ku guulaysato. Ama garsooruhu wuxuu ku siin karaa maxkamad dhageysi buuxda si aad isu difaacdo.

Garsooruhu haddii uu u arko doodahaagu in aanay adkayn waxuu u xukumi karaa

- In milkiiluhu uu guriga kaa saaro isla markaaba
- Inta uu kugu leeyahay milkiiluhu

Qareenka milkiilahaaga ayaa ka doodi kara sababta milkiiluhu uu guriga kaaga saarayo. Markaa ayaad adna ku doodeysaa sababta aaney kaaga saari karin.

### **Sideen ugu diyaargarobaa dacwada dhageysiga?**

1. Soo ururso dhammaan waraaqaha ama dukumiintiyada muhiimka ah ee aad ugu baahan tahay in aad kaga doodo kayskaaga. Taas waxaa ka mid noqon kara:
  - heshiiska kiradaada
  - Rasiidka lacagta dibaajiga aad ku bixisay
  - Liiska uu ku taxan yahay xaalada gurigu siduu ahaa markaad u soo guurtay
  - Liiska ay ku taxan yihiin waxyaabaha guriga ka kharibnaa
  - Rasiidyada kirada aad ku bixisay iyo jeegagga cadeynaya inay kala baxeen bangiga
  - Ogeysiiska guri ka saarida

- Xukun Maxkamadeed oo Kugu Qasbaya inaad Maxkamada Tagto
- Nuquladaada Ogaysiiska Imaanshaha ama Jawaabta, oo ku shaabadeysan tahay taariikhda aad u dhiibtay qareenka mulkiilaha iyo maxkamaddaba.
- Wixii qiimeyn qoraal ah ee ku saabsan dayactirka waxyeelka guriga
- Risiidyadii dayactirka aad guriga ku sameysay
- Sawiro tusaya guriga waxa ka xun

- 
- ❖ Soo qaado waraaqaha asalka ah haddii aad karto. Keen nuqul dheeraad ah haddii ay maxkamaddu u baahato inay qaar la hadhaan.
  - ❖ Haddii aadan hubin inaad wax u baahan tahay, iska soo qado si kastaba ha ahatee!
- 

2. Weydii wixii markhaati ah ee taageeri kara kayskaaga in uu yimaado dacwada dhageysiga. Waa in ay shakhsi ahaan u arkeen waxyeelada guriga ama khilaafaadka idiin dhexeeya adiga iyo milkiilaha. Markhaatiyaalba inta ay ka sii badan yihiin oo ay aqoon gaar ah u leeyihiin kayskaaga way ka sii wacantahay.
3. Fiiri sida nidaamku u shaqeeyo ka hor intaan la gaadhin dacwada dhageysigaaga. Weydii xoghayaha maxkamadda goorta ay maxkamaddu qabaneyso dacwada dhageysiga ee “cadeyn tusida.” Marka hore fiirso dacwad dhegeysiya si aad fikrad uga hesho sida arimahaagu noqon doonaan.
4. Dacwada Dhageysiga ka hor, tababar sii qaado oo ku celceli waxaad rabto in aad tiraahdo. Soo bandhiggaagu waa inuu ahaadaa mid abaabulan oo gaaban. Sameyso liistada qodobbada muhiimka kuu ah.
5. Marqaatiyadaada horay u ogeysii waxaad weyddiin doonto.

### **Maxaa dhacaya haddii aanan ku hadlin Af-Ingiriisiga?**

Haddii aadan ku hadlin Af-Ingiriisiga ama aad dhib ka qabtid xagga hadalka ama maqalka, waxaad xaq u leedahay in aad maxkamada dhexdeeda ku hesho turjubaan. **Waa in aad horey ugu sii sheegtaa maxkamadda sida ugu dhaqsaha badan ee suuragalka ah** in aad turjubaan u baahantahay.

## **Xagee baan u tagaa dacwada dhageysigeyga?**

Markaad timaadid maxkamadda, is ka xadiri xoghayaha maxkamadda. Xoghayaha ayaa kuu sheegi doona halka aad tagi doonto. Waxaa laga yaabaa in ay gidaarka ku dhejiyeen magacyada kaysaska ay maxkamaddu dhageysan doonto maalintaas **ama** ay kor u akhriyi doonaan magacyada bilowga kalfadhiga. Haddii uusan kayska magacaagu ku qorneyn ama la akhrin magacaaga, arag xoghayaha maxkamadda.

## **Sidee buu u dhacaya dacwada dhageysiga?**

Garsooruhu sida caadiga wuxuu ku bilaabayaa in uu sharaxo nidaamka maxkamaddu u soconeyso. Kadibna waxaa la wacayaa kayska koowaad.

Markuu garsooruhu ku dhawaaqo kayskaaga, horay imow oo la kaalay cadeyntaada iyo marqaatiyadaada. Badanaa, dhammaan dacwoodayaasha, eedeysanayaasha, iyo marqaatiyaashuba waa in ay ku dhaartaan in ay runta sheegaan ka hor inta aysan markhaati furin.

## **Maxaan ka irahdaa dacwada dhegeysiga?**

- 1.** Sharax sababta milkiilahu guriga uusan kaaga saari karin. Maxkamadda u sheeg haddii mulkiilahaagu uusan sameynin dayactir loo baahnaa, oo uu ku leeyahay ma aadan bixin kirada laakiinse aad bixisay, uusan ku siin ogeysiis quman oo ku saabsan isbedelka xeerka, ama uu ogeysiiska ku siiyey mar dambe. Haddii aad ka jaratay kirada kharshyada dayactirka, u sheeg.
- 2.** Tus garsooraha caddeyn kasta oo aad keentay. Kor ka Fiiri “Sideen ugu diyaargarobaa dacwada dhageysiga.”
- 3.** Hadaad heysato markhaati, u sheeg garsooraha in aad jeclaan lahayd in ay kuu markhaati furaan. Weydii iyaga sababta uusan milkiiluhu guriga kaaga saari karin.

Haddii milkiiluhu isku dayayo inuu kaa saaro guriga maadama aadan bixin kirada, maxkamadda waxaad weydiisan kartaa qorshe lacag bixineed. Isticmaal [Motion to Reinstate Tenancy under RCW 59.18.410\(2\) and for Order of Limited Dissemination Form.](#)

## **Goorma ayuu garsooruhu go'aanka ku dhawaaqayaa?**

Marka uu dhageysto labada dhinac ka dib, garsooruhu wuxuu go'aansan karaa mid ka mid ah kuwan:

- 1. Kayska kumaad guulaysan.** Garsooruhu wuxuu go'aaminayaa in is difaacaagu ahayn mid wanaagsan. Garsooraha ayaa ku amri doona boliiska in uu kaa saaro guriga. Garsooruhu wuxuu go'aamin karaa in uu deyn kugu leeyahay milkiilahaagu. Garsooraha ayaa laga yaabaa inuu kuu sheego inta ay tahay in aad siiso milkiilahaaga, ama uu gaaro go'aankaas mar dambe.
- 2. Waad guuleysatey.** Garsooruhu wuxuu go'aansaday in aad u soo bandhigtay is difaac wanaagsan oo ku saabsan ka saarida guriga. Garsooraha ayaa baabi'naya dacwada. Khasab kuguma aha in aad guurto, kolayba waqtigan la joogo. Garsooraha ayaa u xukumi kara qaabkan sababtoo ah mulkiiluhu muusan raacin habraacyada saxda ah ee guriga leysaga saaro. Waxaa laga yaaba inuu milkiilahu weli guriga kaa saari karo hadhow, ka dib markii ay saxdo wixii khaladaad ah ee ay ku sameysay howsha ka saarista.
- 3. Garsooruhu wuxuu u baahan yahay dacwo dhageysi oo kaamil ah si uu go'aan kayska uga gaadho.** Waxaa lagu siin doonaa taariikhda la qabanyo maxkamada. Haddii aad wali ku nooshahay guriga, dhegeysiga maxkamadu waxey noqon doonta mudo 30 maalmood gudahood.

## **Gudi xeerbeegto ah miyaa dhageysan doonaa dacwadeyda?**

Taas kama dhacdo "**dacwada dhageysiga ee cadeyn tusida.**"

Haddii garsooruhu amro dacwad dhammaystiran, waxaad xaq u leedahay xeerbeegtida. Haddii aad mid rabto, la soco inay suuragal tahay in aad taas lacag ka bixiso. Weydii xoghayaha maxkamadda macluumaad dheeraad ah.

## **Maxaa dhacaya haddii aan tegi waayo Dacwada Dhageysiga ee Cadeyn Tusida?**

Haddii aadan tagin, ama xitaa hadii aad daqiiqado yar ka daahdo, waxay u badan inaad ku guulaysan waydo dacwada. Garsooraha ayaa u oggolaan doona milkiilaha in uu guriga kaa saaro. Booliisku wuxuu kugu qasbi karaa in aad ka baxdo guriga. Waxaa laga yaabaa in aad bixiso wax kasta oo mulkiiluhu dacwada ku dalbaday. Tan waxaa ka mid noqon kara kirada, dayactirka, kharashyada maxkamadda, iyo kharashka uga baxay qareenka.

## **Milkiilahaygu guriga khasb banaanka ma iiga saari karaa?**

**Maya. Booliiska oo kaliya** ayaa guriga khasab banaanka kaaga saari kara. Mulkiilahu waa inuu tagaa maxkamada si uu booliiska arrinta u soo geliyo.

## **Waxaan helay "Xukun Maxkamadeed oo Guriga iga Saaraya" markii aan tagay Dacwad Shageysiga ee Cadeyn Tusida. Miyaan wali joojin karaa guri ka saarideyda?**

**Lagama yaabo.** Aad ayey u adag tahay in la joojiyo ka saarista guriga marka heerkan la gaadho. Waad joojin kartaa hadii milkiiluhu wax khalad ah ka sameeyo nidaamka guri ka saarista. Isku day in aad hesho caawimaad sharci isla markiiba.

**Haddii guriga lagaaga saaray kirada lagugu lahaa awgeed,** way dhici kartaa in aad "dib u soo ceshotid" heshiiskaaga guriga (oo aad badbadiso ku sii jirida guriga) hadaad bixin karto waxkastoo lagugu leeyahay (kirada aad dib ula dhacday, qarashka maxkamada iyo qareenkaba) 5 cisho gudahood markii ay maxkamada kuu gelisay go'aanka lidiga kugu ah. Waa in aad maxkamada ka codsataa codsi rasmi ah oo aad garooraha uga codsanayso inuu arrinta go'aan uga gaadho (a "motion") waa inaad tan sameeyso ka hor inta uusan booliisku dibada ku dhigin. Isticmaal [Motion to Reinstate Tenancy under RCW 59.18.410\(2\) and for Order of Limited Dissemination Form.](#)

Waxa kale oo aad awood u yeelan kartaa inaad xareysato dacwad aad ku codsaneyso qorshaha lacag bixinta. Isticmaal [Motion to Stay Enforcement of Writ of Restitution and for Payment Plan Under RCW 59.18.410\(3\) Form.](#)

Dacwooyinaasi way dhib badan yihiin. Isku day in aad hesho caawimaad sharci sida ugu dhaqsaha badan.

## **Raadso Caawinaad Sharci**

**Wixii ka baxsan King County**, ka wac khadka tooska ah ee CLEAR Hotline oo ah 1-888-201-1014 maalmaha shaqada inta u dhaxeysa 9:15 subaxnimo ilaa 12:15 duhurnimo. Turjubaano waa lagu qabanayaa.

**King County gudaheeda**, wac 2-1-1 maalmaha shaqada inta u dhaxeysa 8:00 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo. Waxay kuu gudbin doonaan qof ku siiya caawimo sharci.

**Dadka 60 jir iyo wixii ka weyn** ayaa wici kara CLEAR \* Sr taleefankoodu yahay 1-888-387-7111, gobolka oo dhan.

Waxa kale oo aad CLEAR ka codsan kartaa [CLEAR \\*' Online: nwjustice.org/get-legal-help](https://www.nwjustice.org/get-legal-help).

---

Daabacaadan waxay ku siinaysaa macluumaad guud oo ku saabsan xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga. Looguma talogalin in lagu beddelo talo sharciyeed oo gaar ah.

© 2020 Northwest Justice Project — 1-888-201-1014.

(Ogolaashaha in la koobiyeeyo iyo qaybinta dhokumentigaan waxaa la siiyey Isbahaysiga sinnaanta Caddaaladda (Alliance for Equal Justice) iyo shakhsiyaadka aan ka ganacsaneyn oo keliya.)